# Ka Saaritaanada Guryaha Dowlada

Public Housing Evictions


## Waxa aan ku jiraa guri dowladeed waxa aana helay ogaysiis guri ka saarid ah. Maxaan sameeyaa kolka?

Warqadan xogta aruursan ah waxay quseeysaa **kireystayaasha guryaha dowlada** ee la siiyo ogaysiiska Joojinta Heshiiska Liiskooda. "Guryaha Dowladdu" macnahoodu waa guryaha kirada ah ee ay maamusho ama ay maamulkooda kharashkiisa bixiso Hay'ada Guryaha Dowlada. Waxa uu ka helaa lacag barnaamijka guryaha dowladda. Kuwani ma aha guro qolo guryood gaar u leedahay ama Warqada guryaha lagu dago ee Qaybta 8 (Section 8).

Ka saaritaanada guryaha dowladdu waxa ay raacaan hanaanada maxkamadaha gobolka ee guri ka saaritaanada LAAKIIN sidoo kale waxa ay leeyihiin talaabooyin u gaar ah iyaga. Akhri warqadan xogta aruursan ah **iyo** warqadayada xoga aruursan ee *Guri ka Saarida*.

Qaar ka mid waxyaababaha ku qoran warqadan xogta aruursan waxaa dhici karta inaysan ku quseyn adiga haddii aad ku nooshahay guri dowladeed oo ay maamusho hay'adda Guryaha ee Minneapolis [Minneapolis Public Housing Authority (MPHA)] ama St. Paul PHA. Qaar badan oo ka mid ah hay'adaha Maamula Guryaha Dowladdu (Housing Authorities) waxa ay u rogeen guryahooda kuwa qaata barnaamijyadda kaabida guryaha ee kale.

**Hadii aad hesho Ogaysiis Liis Joojin ah, waa ra'yi wacan inaad wacdo xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) si aad u hesho caawimaad markiiba.** Ka hel xafiiska deegaankaaga khadka ah 1-(877) 696-6529.



## Ku Xadgudubka Liiska

Hay'ada Guryaha Dowladu waxa kaliya oo ay u joojin kartaa liiskaaga waa xadgudubyada waaweyn ama kuwa soo noqnoqda ama sababo kale oo fiican. Hay'ada Guryahu waxa ay kuu soo diri ogaysiis joojin liiska ah oo qoraal ah oo kuu sheegaya qaybaha liiska ka mid ah ee hay'adu ay qabto waa aad jabisay. Ogaysiiskan wuxuu kaloo kuu sheegi adiga waqtiga ay hay'adu doonayso inaad guriga ka baxdo.

Waxaad xaq u leedahay inaad eegto qoraalka Hay'ada Guryaha ay hayso ee la xiriira ku xadgudubka liiska. Hadii aadan sameyn waxa hay'ada Guryahu ay sheeganayso inaad sameysay ama hadii aadan qabin inaysan ahayn wax aad u weyn oo keeni kara guri ka saarid waxa ay sheegayaan, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan guri ka saaritaankaaga.

Waa khasab inaad u dirto hay'ada Guryaha ogaysiis qoraal ah oo aad ku codsanayso racfaan waqtiga ugu dambeeya ee racfaanka laga qaadan karo ogaysiiska joojinta liiska. Ka hel xafiiska deegaankaaga khadka ah 1-(877) 696-6529.

Waxaa jira 2 marxaladood oo racfaan. Marxalada koowaad waa Shir Yar oo la qabto. Hadii dhibka aan shirkaa lagu xalin, waxa aad codsan kartaa Dacwo Dhagaysi Weyn.

Qaar ka mid ah hay'ada Guryahu kama bixiyaan racfaano qaar ka mid ah kiisaska. Ka eeg qaybta "Khatar Gelinta Amaanka iyo Dambiyada" ee hoose wixii akhbaar ah ee kale.

## Shirka Yar:

- Waa aad keensan kartaa taakuleeye ama qareen si ay kaaga caawiyaan inaad soo bandhigto kiiskaaga. Hadii aad u baahan tahay turjubaan xilliga kulanka, u sheeg Hay'ada Guryaha. Hay'ada Guryaha waa inay iyadu bixiso kharashka turjubaanka.



- Hadii aadan jabin heshiiska liiskaaga, isku day inaad la timaado shirka daliilo. Daliilahaasi waxa ay noqon karaan waxyaabaha sida qoraalo, warqado ama oraaho ay soo qoreen makhraatiyo adiga ku gargaara.

- Hadii aad ku xadgudubtay heshiiska liiska, isku day inaad soo bandhigto qorshe cad oo aad isaga dhowri in dhibaatooyinkan oo kale ay dhacan mar labaad. Taasi waxay noqon kartaa heshiis ah inaadan u ogolaan doonin qof dhib wade ahi inuu ku soo booqdo mar dambe, ama qorshe aad caawimaad ugu helayso dhibka keenay ku xudgudubka liiska.

  Hadii ku xadgudubka liiskaaga ay ku timi dagaal qoyska dhexdiisa ah. Ka eeg warqada xogta aruursan ee
  *Xaquuqda Guryaha Kiradooda la Kabo ee Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah dhibku ka soo gaaro iyo galmada Xoogid ah.*

  Hadii xadgudubka liiska uu ka dhashay naafanimo, eeg warqadayda xogta aruursan ee *U Fududeynta Suuro Galka Ah: Ma Dooneysaa In Kireystuhu Sameeyo Isbedel Waayo Waxa Aad Tahay Qof Naafo Ah*.

- Hadii aad liiska jabisay iyo hadii kaleba, ka taxadar waxa aad ka oronayo Shirka Yar. Wax walba oo aad tiraahdo adiga ayaa dib laguugu isticmaali karaa ha dhow dacwada.

- Hadii aad u malaynayso in kiiska lagaaga adkaanayo, laakiin waydiiso waqtiga aad u baahan tahay iyo warbixin kirayste oo dhexdhexaad ah ama fiican Qolada Guryaha. Kani waa go'aan aad u culus. Si taxadar leh uga fakar ka hor inta aadan ogolaan inaad guurto. Marba hadii heshiis la gaaro waa khasab inaad adeecdo kana soo baxdo!

  Waydiiso Hay'ada Guryaha in wixii heshiis ah oo aad la gaarto ay qoraal noqdaan. Hadii heshiiska AYSAN ku jirin wax walba oo aad ogolaatay, u qor warqad Hay'ada Guryaha mar labaad kana codso inay bedesho waxa khaldan. **Ha saxiixin, hana ogolaan wax aadan doonayn inaad sameyso ama aadan sameyn karin.**

- Xataa hadii aadan la heshiin, Hay'ada Guryahu waa khasab inay ku siiso guudmar qoran oo ah wixii ka dhacay shirka yar.

Hadii aydaan xal ku gaarin Shirka Yar waxa aad codsan kartaa Dacwo Dhagaysi Weyn. Waqtiga ugu dambeeya ee aad codan karto Dhagaysiga Dacwada Weyni waa inuu ku qornaado qoraalka guudmarka wixii ka dhacay Shirka Yar. Waa inaad ku codsataa Dhagaysiga Dacwada Weyn Qoraal ahaan.


## Dacwo Dhagaysiga Weyn:

Dacwo Dhagaysiga Weyni waa sidii maxkamad qaadid yar oo kale. Waa inaad diyaarsataa dacwadaada.

- Waad soo wadan kartaa qareen ama taakuleeye. Wac xafiiska gargaarka sharciyadu (legal aid) si ay kuu caawiyaan.

- Waxaa dhici karta inaad maqashay mas'uul dacwo qaadid ama gudiga dhagaysiga dacwadaha. Dadka ku jirta gudiga dhagaysiga dacwadaha waxaa dhici karta inay yihiin dad kale oo iyana ah degayaal degan guryaha dowlada ama shaqaale u shaqeeya guryaha dowlada.

- Waxaad xaq u leedahay in turjubaan laguu keeno xiliga dhagaysiga dacwada. Hadii aad u baahan tahay turjubaan, u sheeg Hay'ada Guryaha. Hay'ada Guryahu waa inay iyadu bixiso kharashka turjubaanka.




- Xilliga Dhagaysiga Dacwada, adiga iyo Hay'ada Guryaha qolaba mar bay hadli si ay u sheego waxa dhacay. Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si xushmadi ku dheehan tahay xiliga dhagaysiga dacwada. Sidoo kale adiguna waa inaad si xushmadi ku dheehan tahay ula dhaqanto dadka kale.

- La imow daliilahaaga iyo makhraatiyaashaada si aad u cadeyso inaad jabin heshiiska liiska. La imow cadeyn sheegaysa waxa lagaa sheegayaa inay khalad yihiin. La imow cadeyn sharxaysa wixii qabyo ka ah sheekada ay sheegeen Hay'ada Guryahu. La imow daliilo iyo makhraatiyaal si ay u caawiyaan inaad cadeyso inaad tahay qof guri kireyste ah oo wanaagsan. La imow nuqulo (copies) ah daliiladaada ah si aad u tusto cid walba. Nuqulo adiga (copies) naftaada ugala har warqadaha.

**Ogow:** Qaar ka mid Hay'adaha Guryahu waxa ay leeyihiin xeerar ku saabsan daliilaha Dhagaysiga Dacwada Weyn. Tusaale haan: waxaa dhici karta in lagaa rabo inaad waqti cayiman ka hor aad ku soo sheegto daliilaha iyo makhaartiyaasha aad haysato. Iyana waxaa dhici karta inay kuu sheegaan daliilaha iyo makhraatiyaasha ay haystaan. Waydii Hay'ada Guryaha waxa ay yihiin xeerarka nidaamka dacwo dhagaysigu. Akhri si taxadar lehna u raac.

- Ka eeg warqada xogta aruursan ee ku saabsan Xaquuqda Guryaha kiradooda la kabo ee *[Xaquuqda Guryaha Kiradooda la Kabo ee Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah dhibku ka soo gaaro iyo galmada Xoogid ah.]*

  Hadii xadgudubka liiska uu ka dhashay naafanimo, eeg warqadayda xogta aruursan ee *U Fududeynta Suuro Galka Ah: Ma Dooneysaa In Kireystuhu Sameeyo Isbedel Waayo Waxa Aad Tahay Qof Naafo Ah*

- Hadii ay jiraan dad si gaar loo xushmeeyo beesha ama daris ah oo adiga ku caawinaya, waydiiso inay maxkamada dhagaysigeeda kuu raacaan, si ay uga hadlaan maxkamada iyagoo kuu hadlaya.

- Waxa aad ka heli go'aan qoran Dhagaysiga Dacwada Weyn. Go'aanku waa uu ku sheegi doonaa inaad guulaysatay iyo in lagaa guulaystay midkood. Go'aanku waa khasab inuu ku salaysnaado daliilaha maxkamada la hor keenay waxa uuna bixin doonaa sababta go'aanka.



## Maxaa dhici hadii la igaga Adkaado Dhagaysiga Dacwada Weyn?

Hadii lagagaaga adkaado Dhagaysiga Dacwada Weyn, Hay'ada Guryahu waxa ay kuu soo diri ogaysiis ay ku qoran tahay maalinta kama dambeysta ah ee aad guuri. Hadii aadan maalintaa guurin, Hay'ada Guryahu waxa ay ka xareysan kartaa dacwo guri ka saarid ah oo adiga kaa dhan Maxkamada Gobolka.

Waa aad waydiisan kartaa xaakimka dacwo maxkamadeed oo heer Gobolka ah. Wac xafiiska gargaarada sharciga (legal aid) markiiba si aad caawimaad uga hesho. Waxaa kaloo waydiisan kartaa Hay'ada Guryaha waqti aad ku guurto in lagu siiyo, warbixin wanaagsana lagaa bixiyo, adigu aad labadaa wax ku bedelato inaad guurto aadana maxkamad uga mudacin guri ka saarida.

Hadii dacwo guri ka saarid ah la xareysto, waxa ay noqon wax cid walbaa arki karto. Guri ka saariddu waxa ay ku jiri kartaa diiwaankaaga guri kiraystaha ilaa oyo 7 sanno. Si taxadar leh uga fakar inaad ka dagaalanto guri ka saarida ama aad ogolaato inaad guurto. Marba hadii heshiis la gaaro waa khasab inaad ka adeeco kana soo baxdo!

## Maciinada Macquulka ah

Haddii adiga ama cid qoyskaaga ahi ay naafo tahay waxaa jira xeerarka kale oo arrinta quseeya. Tusaale ahaan: Hay'adaha Guryaha Dowladdu waxa ay doonaysaa inay joojiso heshiiska (lease) guriga aad ku degan tahay waayo wax ku jira heshiiska (lease) ama xeer kale ayaa la jabiyey. Haddii qof naafo ahi uu jabiyey xeerka, sababta jabinta xeerkuna ay tahay naafanimadda awgeed, waxa aad codsan kartaa in laguu fidiyo maciin macquul ah haddii aad u baahan tahay in isbedelo lagu sameeyo heshiiska (lease) guriga aad ku degan tahay naafanimadaadda awgeed.

Eeg warqadayda xogta aruursan ee *U Fududeynta Suuro Galka Ah: Ma Dooneysaa In Kireystuhu Sameeyo Isbedel Waayo Waxa Aad Tahay Qof Naafo Ah*.

## Khatar Gelinta Amaanka iyo Dambiyada

Hadii adiga ama qof qoyskaaga ka tirsan ama qof marti ku ahi uu isticmaalayo maandooriye, ama sameeyo dambiyo kale ama uu khatar ku yahay amaanka dadka kale ee kireystayaasha ah ama shaqaalaha, Hay'ada Guryahu khasab kuma aha inay qabato Shirka Yar ama Shirka Weyn. Ogaysiiskaaga joojinta ah waxa u kuu sheegi in Hay'ada Guryahu ay ka boodayso hanaankaa iyo in kale, aysana khasab kugu ahayn inaad guurtaa, Hay'ada Guryahu waxa ay ka xareysan dacwo guriga ka saarid ah Maxkamad Gobol.

- Hadii guriga lagaaga saarayo moondooriye isticmaal ama waxyaabo kale oo dambi ah, wax oraah ah oo ku saabsan amuurta cidna ha siin. Ha ku qiran wax isticmaalid moondooriye ah ama wax fal dambi ah heshiis aad la gaarto Hay'ada Guryaha. Hadii guri lagaaga saaro isticmaal maandooriye ama dambi gaysi, laguma siin doono guri dowladadeed oo kale3 sanno ama muddo ka badan.

- Joojinta heshiiska liiskaaga kuma salaysnaan karo uun xirid lagu xiray. Hay'ada Guryahu waa inay soo baaro ayna cadeyso inay u badan tahay inaad sameysay wax sharci-darro ah oo kalifay xiridaada. Hadii Hay'ada Guryahu ay cadeyn karto taa, kolkaa heshiiska liiskaaga waa la joojin karaa xataa hadii aysan wax dambi ah aysan kugu soo oogin bilaysku ama aan maxkamadi kugu helin.

- Hadii aad qabto in Hay'ada Guryahu ay khaldan tahay, waxa aad u baahan tahay inaad sharaxdo sababta. La imow maxkamada cadeyn ah in ay khaldan yihiin.

- Hadii aad u malaynayso in maxkamada lagaaga adkaanayo, marmarka qaarkood waxa aad la gaari kartaa heshiis ah in lagu siiyo waqti aad ku guurto. Hadii aad heshiis gasho waa KHASAB inaad adeecdo oo ka soo baxdo – kolka hubi inaad heshiiska ka soo bixi karto.



## Xeerar Hadii aad tahay Dhibane Dhib Ka soo Gaaray Dagaalka Qoysaska Dhexdooda ka Dhaca


Hay'ada Guryahu guriga kaama saari karto hadii dhibaatooyinku ay u dhaceen sabab ah dagaal reer dhexdiisa ah, dabaglid, dagaalka dadka is shukaansada dhex mara galmo xoogid ah oo adiga ama qof xubin ka ah qoyskaaga loo gaystay. Guriga lagaagama saari karo wicida bilayska. Minnesota, dagaalka qoyska dhexdiisa ah waxaa ku jiri kara dagaal, ama u hanjabidaadyada ay geystaan ilmahu, qaraabadu ama xubno kale oo qoyska ah.

U sheeg Hay'ada Guryahu hadii aad qabto in xadgudubka liisku u dhacay mid ka mid ah sababahaa. Eeg warqada xogta aruursan ee,
*[Xaquuqda Guryaha Kiradooda la Kabo ee Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah dhibku ka s oo gaaro iyo galmada Xoogid ah.]*

Hay'ada Guryahu waxa ay ku waydiisan kartaa inaad ku tuso daliilo ah dhacdooyin dagaal qoyska dhexdiisa ah ama galmo xoogid ah 14-cisho gudahood. Waxaa inay kugu waydiistaan daliilahaa qoraal ahaan. Marmarka qaarkood, helida amar maxkamadeed ayaa ah qaab fiican oo lagu cadeyn karo dagaalka qoyska dhexdiisa ah. Laakiin Hay'ada Guryahu **kuguma** khasbi karto inaad soo hesho amar maxkamadeed. Waxaa iyana jira qaabab oo lagu cadeyn karo arrintaa. Ka hel gargaar dhanka sharciyada (legal aid) ka ama taakuleeye dhibanayaasha dagaalka qoyska dhexdiisa ah dhibku ku soo gaaro ama la galmood xoogid ah loo gaysto hadii aad u baahato in lagaa caawiyo inaad cadeyso kiiskaaga.

## Kiro Bixin La'aanta

- Hadii aadan ku bixin kiradaada waqtiga la rabo in la bixiyo, Hay'ada Guryahu waxa ay kuu soo diri ogaysiis oranaya waa inaad kirada ku bixisaa 30-cisho am aad guurto.



- Hadii lacagta kirada aadan hayn, degdeg u wac Hay'ada Guryaha si aad u eegto inaad ka wada shaqeyn kartaan qorshe tartiib-tartiib u bixin kirada ah. Xasuusnow cida aad la hadasho iyo waxa ay kuu sheegaan inaad sameyso. Sidoo kale, kala hadal waaxda gagaarka bulshada ee degmadaada inaad ka hesho Gargaar Degdeg ah iyaga.

- Hadii aan kiro lagugu lahayn, kala hadal Hay'ada Guryaha sababta ay u aaminsan yihiin in lagugu leeyahay kiro. Xasuusnow cida aad la hadasho iyo waxa ay kuu sheegaan adiga. Hadii aadan wali ku raacsanayn mowfiqkooda, wac maamulahaaga guriga waydiisana Shir Yar in la qabto. Warqad qor si aad qoraal uga haysato inaad waydiisatay taa isaga. Xasuusnow, in mustaqbalka aad mar walba ka hesho rasiid ama aad meel ku qoroto lacagta kirada aad bixiso si aysan u jirin wax jaah-wareer ahi.

- Waxa aad xaq u leedahay Shir Yar in lagula yeesho. Hadii ay taasi xalin waydo dhibaatada, waxa codsan kartaa Shir Weyn in lagula yeesho.

- Hadii kirada aadan bixin iyadoo sababtu tahay dhibaatooyin hagaajin la'aan guriga ah, codso Shirka Yar ama Shirka Weyn si looga hadlo hagaajinta guriga ee loo baahan yahay. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Ka Helida Qolada Gurigu Inay Hagaajiso Wixii Halaysan.*

- Hadii aad qayto kiradaada ama dakhligaaga si sax ah looma xisaabin, qaado warqadaha aad haysato oo dhan ee muujinaya dakhligaaga ka diba tus maamulaha guriga.

- Hadii aad ogolaato inaad dib lacag u siiso Hay'ada Guryada, heshiisku waa inuu qornaadaa.

**Ogow:** Cadadka lacagta ah ee aad bixinayso bil walba ee ah wixii heshiis qorshe lacag dib u bixin ah waxaa xadida xeerarka Hay'ada (HUD). Isku darka kiradaada iyo cadadka dib u bixinta lacagta lagugu leeyahay kama badnaan karaan 40% dakhligaaga bilaha ah. Hadii aad wax dhibaato ahi ay jiraan, wac xafiiska gargaarka dhanka sharciga (aid office) ee deegaabkaaga.

Haddii aadan bixin kiradda ama aadan kala shaqeyn qoladda guriga heshiis waanwaan ah 30 cisho gudahooda, Hay'ada Guryahu waxa ay xareysan kartaa dacwo guri ka saarid ah. Waxaa laguu keeni doonaa kolkaa warqado maxkamadeed, oo kuu sheegaya kolka aad maxkamada tagayso. **U toog hay warqadahaa.**



Waxaa aad xaq u leedahay sida uu dhigayo sharciga gobolka Minnesota inaad kirada, iyo wixii kale ee kharashka maxkamadeed ah aad maxkamada ka bixiso si aad guriga ugu sii jirto.

## Kirada Ugu Yar

Qaar badan oo hay'ada guryaha ahi waxa ay leeyihiin "kiro ugu yar" oo ay tahay in ay kireystayaashu bixiyaan xataa hadii dakhligoodu uu aad iyo aad u yar yahay. Hadii aadan bixin karin krada ugu yar ee la bixiyo, waxaa dhici karta inaad hesho waxa la yiraa "darxumo uga dhaafid" kirada oo joogta ah ama ku meelgaar ah. Degdeg u waydiiso maamulaha guriga inaad kiro ka dhaafid aad hesho. Xasuusnow cida aad la hadasho iyo waxa ay kuu sheegaan inaad sameyso.

Waa inaad heshaa kiro ka dhaafid hadii aadan kirada bixin karini sababta oo ah:

- shaqo la'aan ayaad noqotay
- waxa aad sugaysaa in laguu bilaabo gargaarka dowlada, ama waxaa lagaa joojiyey cayrtii aad qaadan jirtay (laakiin aan ahayn in sababta lagaa joojiyey ay tahay ku xadgudubid nidaamkeeda)
- in qoyska dhawaan laga geeriyooday
- guriga waa lagaa saari hadii Hay'ada Guryahu ay ku adkaysato inaad kiro bixiso ama ay ku haystaan dhibaatooyin kale oo dhaqaale.


Dar-xummo u dhaafida kiradu waxa ay bilaabmi bil ka dib kolka aad codsato. Hadii sababta ka dhaafida kiradu ay tahay mid ku meel gaar ah (soconaysa 90-cisho ama ka yar), Hay'ada Guryahu waxa ay dib u dhigi dacwada guri ka saarida ah laakiin waxa ay kugu soo dalaci kirada ugu yar ee la bixiyo waxa ayna ku waydiisan inaad bixiso mar uun mustaqbalka ah. Waxaa aad ka codsan kartaa qorshe tartiib-tartiib dib ugu bixin ah inay ku sameeyaan.

Hadii sababta aadan u bixin kiradu ay tahay mid waaraysa (soconaysa muddo ka badan 90-cisho), waa in lagaa dhaafaa bixinta kirada ilaa inta xaaladaada lacageed ay isbedelayso.Hadii Hay'ada Guryahu aysan sameyn doonin waxyaabahaa, ama hadii jaa guriga lagaa saarayo, wac xafiiska gargaarka dhanka sharciyada (legal aid) si laguu caawiyo.

## Dakhliga Shaqada iyo Kirada

Kolka aad ku nooshahay guri dowladeed, kiradaada waxaa laga dhigaa 30% dakhligaaga. Nidaamku waxaa dhici karta inuu saa ka duwan yahay hadii aad ku nooshahay guri dowladeed oo ay maamusho Hay'ada Guryaha Dowlada ee Minneapolis (Minneapolis Public Housing Authority).

Waxaa jira waxyaabo muhiim ah oo laga reebo xeerkan. *Marmarka qaarkood* isbedelada dakhiga qoyska *markiiba* ma saameeyaan cadadka kirada ah ee la bixinayo. Xaaladaha caynkaa ah waxaa la yiraa **dakhliga la kasbado ee aan la xisaabta lagu darin.** Qaar ka mid kuwaasi waa :



- Lacag aad ka kasbatay shaqo aad heshay 6 bilood gudahood  xiliga aad qaadanaysay gargaarka (MFIP) ka.
- Waxa aad ahayd shaqo la'aan ama shaqo ku haboon xirfadahaaga ma aadan hayn muddo sannad ah, ka hor inta aadan shaqada helin. Aan hayn shaqo ku haboonayn macnaheedu waxa aad kasbatay lacagta ugu yar ee lagu shaqeeyo ama ka yar muddo aad ka yarayn 500-saacadood oo shaqo ah sannadkii hore. Sannadkii hore taasi waxay ahayd qiyaastii $5,000.
- Hadii aad ku jirto barnaamij shaqo u tababarid ah.

U sheeg Hay'ada Guryaha ama xaakim hadii mid ka mid ah xaaladahaasi ay adiga ku quseeyaan. Xisaab ku darid la'aantu waxa sii jiri 24-bilood ka dib kolka shaqada lagu qoro. Xeerarka dakhliga la kasbado ee aan xisaabta lagu darini waa ay dhib badan yihiin, sharciga dhankan quseeyaana waa uu isbedeli dhawaan. Hadii aad dhib ama su'aalo qabto, la xiriir xafiiska gargaarka dhanka sharciyada (legal aid).

## Cayrta iyo Kirada

Hay'ada Guryahu waa khasab inay yareyso kiradaada hadii dakhligii cayrta lagaa gooyey sababtoo ah waxa aad wada isticmaashay 60-bilood ee laguu ogolaa inaad qaadan karto (MFIP). Laakiin ma ay yareyn doonto hay'ada kiradaada hadii dakhligii cayrta lagaa gooyey iyadoo sababtu tahay khaa'inimo ama ku xadgudubka xeerarka cayrta (ganaax). Marmarka qaarkood, Hay'ada Guryahu waa ay ku khaldanaan kartaa sababaha ganaaxa. Dhamaan ganaaxyada oo dhan looma wada tiriyo ujeedadan. Wac xafiiska gargaarka dhanka sharciyada (legal aid) hadii u dhib ku haysto.

## Isku day inaad Iska Ilaaliso Guri ka Saarida

Mar walba waa ra'yi fiican inaad iska ilaaliso guri ka saarida. Dacwada guri ka saarida ah waxa ay gashaa diiwaanka dadweynaha, qolada guryaha kalena waa ay eegi karaan diiwaanadaa. Waa ay adkayn inaad hesho meel cusub. Kolkaa, hadii aad u malaynayso in maxkamada lagaaga adkaan doono, isku day inaad guurto ka hor inta aysan Hay'ada Guryahu ka xareysamn maxkamad kiis guri ka saarid ah. U sheeg Hay'ada Guryaha hadii aad guurayso si kolkaa aysan u xareysan dacwo guri ka saarid ah. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Guri ka Saarida* iyo *Tirtirada Guriga Ka Saarida*.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**